



## **Wargelin ku aadan Waalidka**

Maanta wixii ka dambeeya waxaanu diiradda saari doonnaa dhaqdhaqaaqa ka jira Dugsiga!

Carruur badan oo Iswiidhan ku nool, ayaa maalinka intiisa badan si joogta ah u fadhiya, waxaanu doonaynaa inaanu taasi wax ka beddelno.

Dhaqdhaqaaqaha isboortiga ayaa iskaashi la leh dugsiga si loo abuurro dareen farxadeed maalin kasta. Taasoo ah hawl ka socota dowladda gaar ahaan Waaxda Ururrada Isboortiga ee Qaranka oo hawshani ka wadda dalka oo idil.

Waxaad ka akhrisan kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hindisaha dhaqdhaqaaqa dugsiga halkan...

[www.rf.se/rorelsesatsningiskolan](http://www.rf.se/rorelsesatsningiskolan)

Daraasad la sameeyay ayaa muujinaysa in carruurta dhaqdhaqaaqa badan in ay ka wax qabad wanaagsan yihiin Dugsiga. Dhaqdhaqaaqu wuxuu u suuro geliyaa carruurta:

- Si ka fiican wax u bartaan
- Si ka fiican xoogga wax u saari karaan
- Helaan xusuus ka fiican
- Ay sii kordhisaa kalsoonida ay qabaan.

Waxa la ogaaday in Dugsiyada ay dhaqdhaqaaqa ku badan yihiin aanay ka dhicin isku dhac, ayna ka niyad wanaagsan yihiin kana jawi wanaagsan yihiin.

Sidaa daraadeed, waxaanu ka shaqeynaynaa siyaabo badan, si ay carruurta ay u dhaqdhaqaaqaan inta badan maalin dugsiiyeedka.

**Talooyin adiga ku khuseeya haddii aad tahay waalid / Mas'uul -haye.**

Adiga oo ah waalidka waxaad ku caawin kartaa ubadkaaga adigoo u sheegaya sida ay muhiim u tahay in ay xarrakaad sameeyaan maalin kasta. Qaar ka mid ah talooyinka sahlan waxa ka mid ah in ay qaataan jaranjarrada halkii laga qaadi lahaa wiishka, ama socodaan, ama baaskiilka dugsiga u qaataan, ama hal muxaddo ka hor ay baska kaga degaan. Waxaad ku dhiiri gelin kartaa Ubadkaaga in ay dhaqdhaqaaqaan, ama la xiriiraan Urur isboorti.

Fadlan weydii haddii wax cusubi ka dhacaan Dugsiga oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa.

Waxaan doonaynaa in ardaydeenna aynu ka caawinno helitaanka waaya-aragnimo wanaagsan oo dhaqdhaqaaq ah, horumarin xagga bulsho ahaan iyo in ay isku dayaan inay dadaali karaan. Mustaqbalka fog, waxaanu dooneynaa in aan wada dareenno, wanaag, ku guuleysano dugsiga kuna noolaadaan nolol firfircoon!

